

PROJECT Connect

Waxbarashada Ardayda
Waayo-aragnimada Hoy la'aanta

Isku-xirka Mashruuca (Project Connect) waxa uu hubiyaa xuquuqaha waxbarasho ee caruurta iyo dhalinyarada ay haysato waayo-aragnimada hoy la'aanta sida lagu qeexay Xeerka Caawimaada Hoy La'aanta ee McKinney-Vento

Adeegyada Barnaamijka

Isku-xirka Mashruuca (Project Connect) waxa uu la shaqeeyaa wakaalado badan iyo degmooyinka ku xeeran dugsiga si ay u bixiyaan caawimaada:

- Xulashada iyo diiwaan-gelinta dugsiga
- Wax ka qabashada caqabadaha saameeya dugsiga imaanshaha iyo ka-qayb-galka buuxa
- Boorsooyinka buugaagta iyo agabyada dugsiga loogu talagalay ardayda
- Isku-dubba-ridka dugsiga gaadiidka
- Helitaanka dukumiintiyada lagama maarmaanka ah sida waraaqaha dhalashada, diiwaanada dugsiga, iyo diiwaanada caafimaadka
- Xallinta muranka la xiriira dugsiga doorashada iyo diiwaan-gelinta





Waa Maxay Macnaha "Hoy La'aanta"?

Erayga "carruurta iyo dhalinyarada hoy-laawayasha ah" waxaa loola jeedaa shakhsiyaadka aan haysan hoy/guri go'an, degganaansho joogto ah oo ku filan oo habeenkii ah.

Waxaa ka mid ah kuwaas oo ah:

- La wadaagga guri qof kale sababtoo ah waayitaan guri, dhibaato dhaqaale, ama sabab la mid ah
- Ku noolaanshaha hudheelada/moteellada ama hoteelada
- Joogista jardiinooyinka guri guur-guura (trailer) ama teendhada/xerada sababo la'aanta mid kale oo ah deegaan/hoy ku filan
- Ku noolaanshaha xaalad deg-degg ah ama Gabaadyo (Shelters) ku-meel-gaar
- Dhalinyaro aan ku jirin gacanta xannaanaynta waalidkood ama ilaaliyaha, sida kuwa ka cararay ama laga saaray gurigoodii

Si aad ula xiriirto Xiriiriyaha Hoy-laawaha/Darbi-jiifka ama xubin kale oo ka tirsan kooxda Isku-xirka Mashruuca (Project Connect), fadlan soo wac ama iimayl u dir:

- **614-365-5140**
- **ProjectConnect@columbus.k12.oh.us**